



Dawladda Goboleedka Waqooyi Bari, Soomaaliya

Ka dib shir uga socdey illaa bishii October, 2017-kii, Guddiga Siyaasadda ee Ururka Waqooyi Bari(UWB), wada xaajood iyo tashi dheer la galay bulshada kala geddisan ee Reer Waqooyi Bari gudo iyo dibadba, laga bilaabo Febraayo 12-keeda, 2018-ka, Guddiga Siyaasadda Ururka Waqooyi Bari ee W-6 ayaa ku dhawaaqay xubanaha hoos ku xusan inay noqdaan hoggaanka kumeel-gaarka ah (Interim Government) ee Dawladda Waqooyi Bari (Sanaag, Sool iyo Bari).

Sidaa daraadeed ka dib markay arkeen Dastuurka Ururka Waqooyi Bari gaar ahaan qodobbadiisa 7-aad ilaa qodobka 12-aad, waxa Guddiga Siyaasadda isu raacay in:

1. Guddoomiyihii Ururka Waqooyi Bari (UWB) **Dr. Maxamuud Axmed Cabdalle** yahay Madaxweynaha Dawladda Goboleedka Waqooyi Bari 4-ta sannadood ee soo socota.
2. Guddoomiye Ku-Xigeenkii Ururka Waqooyi Bari(UWB) **Mudane Cabdullaahi Cali Ibraahim (Geelle)** yahay Madaxweyne Ku-Xigeenka Dawladda Waqooyi Bari 4-ta sannadood ee soo socota.

Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka ka dib marka loo dhaariyo xilalkooda cusub, waxa bannaanaan doona jagooyinkii horay ay uga hayeen Ururka, jagooyinka Guddoomiyaha iyo Ku-Xigeenka, waana loo tartamayaa, tartan doorasho ururka UWB dhexdiisa ah.

Golaha xukuumadda waxa soo dhisaya Madaxweynaha isagoo la tashanaya Madaxweyne Ku-Xigeenka. Sidoo kale wuxu soo magcaabayaa golaha Caddaaladda, Qareennada Maxkamadda Sare iyo taliyayaasha ciidammada kala duwan.

Gunaanad:

Golaha Siyaasadda ee W-6 ayaa ah aasaaska Golaha Baarlammaanka oo ka koobnaan doona laba gole: Golaha Sharciyaqaannada iyo Golaha Guurtida. Guddoonnada Golayaasha Baarlammaanka waxa si rasmi ah loo dhisi doonaa marka golayaasha xukuumaddu deegaanka Waqooyi Bari Soomaaliya ka hawl bilaabo.

Mahadsanidin:

Guddiga Siyaasadda ee Ururka Waqooyi Bari



## Golaha Xukuumadda Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari, Soomaaliya

Laga bilaabo Feebaraayo 15, 2018, ka dib markaan la tashaday Madaxweyne Ku-Xigeenka Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari iyo Guddiga Siyaasadda, waxan go'aansaday inaan xubnaha hoos ku xusan u magcaabo xilalka soo socda, oo ka mid noqonaya Xukuumadda Waqooyi Bari Soomaaliya.

1. Wasiirka Iskaashiga Qorshaynta iyo Arrimaha Fadaraalka - **Maxamed Jaamac Salaad**
2. Wasiirka Arrimaha Gudaha, Xiriirka Gobolada ahna M/K/Xigeenka - **Cabdullaahi Cali Ibraahin (Geelle)**
3. Wasiirka Difaaca iyo Nabadgelyada - **Axmed Maxamed Guuleed**
4. Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare - **Dirir Maxamuud Ducaale**
5. Wasiirka Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Saxaafada - **Cabdifataax Maxamed Warsame**
6. Wasiirka Caafimaadka - **Dr. Axmed Maxamuud Nuur**
7. Wasiirka Maaliyadda - **Xasan Maxamuud Samatar (Badeed)**
8. Wasiirka Qoyska, Arrimaha Bulshada, iyo Xaquuqul Aadamiga - **Shaadiya Xuseen Cali**
9. Wasiirka Dhallinyarada, Dalxiiska, iyo Isboortiga - **Cabdiraxiin Khaalid Suldaan**
10. Wasiirka ganacsiga, warshadaha iyo khayraadka -- *Dib baa laga soo magcaabi*
11. Wasiirka beeraha, kaluumaysiga iyo xoolaha -- *Dib baa laga soo magcaabi*
12. Wasiirka Awqafta, Cadaaladda iyo Arimaha Diinta -- **Dr. Sheekh Maxamed Maakhiri**
13. Wasiirka Dekedaha, Gaadiidka iyo Garoomada -- *Dib baa laga soo magcaabi*

Dhammaan xubnaha magcaaban ee aan kor ku xusnay, waxay waajibaadkooda shaqo guda geli doonaan, ka dib marka loo dhaariyo xilalka ay qaban doonaan.



Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari

Dr. Maxamuud Axmed Cabdalle